Wareega amaanka

Göteborgs Stad

Baro ilmahaaga iyo laf ahaantaada waalid ahaan!

Wareega amaanka waa kulamo kooxeed looguna talogalay adigaaga haysta carruur ah da'da 0 ilaa 6 sano. Halkan waxaad ka helaysaa caawimaad in aad ogaato baahida ilmahaaga kuna horumariso waalidnimadaada. Adigu waxaad xitaa wax dheeraad ah ka baranaysaa wada shaqaynta u dhaxaysa ilmaha iyo waalidka. Dhinaca Wareega amaanka waxaad ku helaysaa qaabka hab-dhaqanka waalidnimadaada taas oo ilmahaaga ka caawin karta inuu dareemo amaan oo yeesho isku kalsoonaan fiican.

goteborg.se/foraldrastod

Wada hadal, talo iyo taageero

Siddeed kulan kooxeed ayaynu kaga hadli doonaa mawduucyo kala duwan kuwaas oo dhammaantood la xiriira wada shaqaynta u dhaxaysa ilmaha iyo waalidka. Waxaanu isticmaalnaa filimo tusaale ah, kuwaas ayaynu ka daawanaynaa baahida ilmahu u qabo amaan iyo in waxyaabo cusub uu ogaado nolosha maalinlaha ah.

Waa muhiim in la isku dayo kulan kasta si aanay kuu dhaafin qaybo muhiim ah oo ka mid ah nuxurka.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan kulamada:

Baar baahida ilmaha
Waxaynu baranaynaa ilmuhu baahida uu u qabo taageero laga helo waalidka. Maxay tahay micnaha in aasaas amaan ah loo ahaado ilmuhu inuu ogaado waxyaabo cusub iyo meel amaan ah oo dib loogu soo noqdo?

Qiimaha in la wada joogo
Waxaynu baranaynaa sida aynu ilmaha uga caawin karno in maareeyo dareenada. Sidee ayaynu u abuuraynaa xiriir fiican oo dhiga aasaas caadifiyan xasiloon oo ilmuhu helo? Sidee ayaynu ula joogi karnaa ilmaha xitaa marka ay jiraan dareeno adag?

Jidka loo marayo amaanka
Waxaynu eegayna baahida ilmuhu u qabo xiriir oo ka fikiraynaa amaankeena gaarka ah iyo nuglaanshaheena. Sidee ayaa in aynu diyaar ula nahay caadifadeenu ay raad ugu yeelataa qaabka ilmuhu u soo gudbinayo baahidiisa iyo dareemadiisa?

Marka ay adagtahay in la ahaado waalid
Mar kasta ma fududa in la ahado waalid. Waxaynu eegaynaa dheelitirnaanta u dhaxaysa in la ahaado qof dareenkooda fahmaya oo xitaa si cad wax ugu sheegaya marka lagu jiro xaalado yara adag.

In la turjumo dabeecadda ilmaha
Waxaynu eegaynaa sida qofku waalid ahaan u fahmi karo dabeecada ilmahiisa oo ilmaha uga caawin karo in uu qaab fiican u maareeyo dareemadiisa.

Wareega amaanka waa siddeed kulan kooxeed kuwaas oo adigu waalid ahaan helayso caawimaad in aad fahanto ilmahaaga iyo baahida ilmahaaga iyo xitaa in laf ahaantaada aad fahanto si ku salaysan waayoaragnimadaada iyo baahidaada. Fikradahan waxay keenaan fursado fiican si aad u horumariso waalidnimadaada, si fudud u awoodo in aad wajahdo baahida ilmahaaga oo aad amaan u abuurto ilmahaaga.

Göteborg waxaa Wareega amaanka lagu bixiyaa dhowr ah xarumaha qoyska iyo xitaa dhinaca qaybaha caawimaada ee adeega arrimaha bulshada.

Dhinaca Wareega amaanka boggeeda af Ingiriisida ah waxaa ku jirta warbixin dheeraad ah: https://www.circleofsecurityinternational.com/

Ma doonaysaa inaad dheeraad ka ogaato ama is qortid koox?

Warbixin dheeraad ah waxaad ka hel:
goteborg.se/foraldrastod

Wada shaqayn u dhaxaysa:

COSP

Circle of Security Parenting

goteborg.se/foraldrastod